
Falanqeynta buugga “DIRKII SACMAALLADA”

Axmed ibraahim cawaale

hargeysa,2015.



Soo koobistii : cabdicasiis idiris aw-cali

2017.

Qodobbada ugu muhiimsan

- Hordhac ku saabsan soo saarista buugga iyo qoraaga .
- Magaca “soomaali” waa maxay ?
- Xageebey soomaalidu ka soo jeeddaa ?
- Dhulka buunt(PUNT) iyo xidhiidhka ilbaxnimadii faraacinada iyo soomaalida ?
- addoonsiga iyo carriga soomaalida.
- Is-riixriixa oromada iyo soomaalida.
- Maxaa ka jira carabnimada soomaalida ?.
- dhaqanno iyo diimo hore ee dhulka soomaalida.
- Ilaxnimadii hore ee soomaalida.

- **iyo ugu danbeyn Naqdinta buuggan.**

Faallo ku saabsan Qoraaga

- waa Axmed Ibraahim Cawaale oo ku dhashey degaan u dhaw buurta gacan-libaax. Waxa uu bartey culuumta xisaabta iyo deegaanka .
- Waxa uu qorey buugta kala ah:
- 1.QAYLO-DHAAN DEEGAAN:qoraallo xulasho ah(2010).
- 2.SITAAD is dareen galinta diineed ee dumarka soomaaliyeed,2013.
- 3.THE MYSTERY OF THE LAND OF PUNT UNRAVELLED, (2013).
- 4.MUQADAMKII XEEBAHA BARIGA x.sharma'arke cali saalax,2014.

Waxa uu axmed ibraahim cawaale ku hawlanaa muddo ku siman 22 gu' arrimaha samo-falka iyo horumarka

Afeefta buugga

- Xusitaanka sheekh,shariif ,qof ama qolo ,wadaad ama waranle waa u jeeddo aqoon baadhiseed oo aanay ku lammaanayn u jeeddooyin siyaasadeed mid dad ama mid deegaanba.
- Isagoo qoraagu ereryga "carri ama dhul soomaaliyeed" adeegsadey, kana gudbey ereryada siyaasiga ah sida somaliland puntland somalia ,iyo kywa ka midka ah.

Tabaha ay baadhistani adeegsatey

- 1.wixii qoraallo hore ahaa buug ama baadhis hore.
- 2.socdaallo iyo sahamin uu qoraagu ku tagey goobo ku wacan in laga sameeyo degel baadhis sida buuraha silsiladda ah ee ku teedsan gacanka cadmeed.
- 3.xogaha internetka gaar ahaan degellada lagu kalsoonyahay sida baadhitaannada hidde-side(DNA)ee lagu xusey website-yadaas.
- 4.hufis iyo kala shaandheyn uu sameeyay qoraagu.

- Waxana uu qoraagu adeegsadey baadhista nooca loo yaqaan historical methadology.

U jeeddada buugga(objectives)

Baadhistani waxa ay ka war celinaysaa weydiimo dhawr ah oo isugu biyo shubanaysa :

1.Xageebey soomaalidu ka soojeeddaa?

- Waxana ay daweynaysaa dhibaatada su'aalaha tirada badan ee soomaalidu iska weydiiso meel-kasoo-jeedka soomaalida iyo waliba afka soomaaliga.

Weydiimaha buuggan uu ka jawaabayo

- Xageebey soomaalidu ka soo jeeddaa ?
- Maxaa ka jira carabnimada soomaalida ?.
- Maxaa ka jira Is-riixriixa oromada iyo soomaalida ?
- Maxaa laga ogyahay Dhaqashada geella ?
- Ma jiraan Diimo hore iyo dhaqanno hore oo soomaaliyeed ?.
- Ma jiraan Ilbaxnimooyin hore oo soomaaliyeed ?.

Waxa weydiin mudan ah, Maxaynu ka rabnaa ogaanshaha sooyaal bulsho,oo soo taxnaa ammin aad u fog?

- Miyaanay ka habbooneyn timaaddada(mustaqbal) in laga fakaro?

Erey celin kooban :

- Sooyaalka iyo dhaqanka ay sheegato bulsho ama ay isu tiriso,waa midka ka gaar yeella bulshooyinka kale,gundhigna u noqda astaynta ahaanshiyaheeda, kala duwanaanshaha bulshooyinkuna waa mid ka qeyb qaadata hodminta dhaqanka ee bulshooyinka adduunku

Dhibaatada baadhistan

- Iyadoo aanay jirin degel-baadhiso(archeology research) qoto dheer oo laga sameeyey tobanaankii sanno ee ugu danbeeyey dhulka soomaalida.
- 2.baadhisaha la hayo iyadoo ay diyaariyeen aqoonyahanno reer galbeed ah oo u badnaa xilligii gumeystaha.

Sidaa darteed mudnaanta ay leedahay baadhistani waa in dadka soomaalidu iyagu ay u soo jeestaan baadhista af-kooda iyo sooyaalkooda hore, waana ta uu dhabbaheeda qaadey qoraagu.

1.Magaca ‘soomaali’ waa maxey ?

Buuggu waxa uu qorayaa dhawr aragtiyood oo laga bixiyay meel ka soo jeedka magaca SOOMAALI,iyo waliba xilligii la bixiyay.

Waxana uga caansan aragtiyahaas kuwan hoos ku qoran :

- 1.Awowga **samaale**

Awow hore oo la rumeysanyahay in ay ka soo jeeddo soomaalidu,sidaa darteed loogu magac darey .

- 2. ereryga **SAMALA**

Ereygan Samala oo uu qoraaga BURTON ka soo qaadey qaamuus carbeed,oo lagu macneeyay “isha ayuu ka tuurey.

- 3.SOO-MAAL

Waa farriin qof loo dirayo in xoolo uu soo liso,waxaanay caddeynaysaa Marti soorka soomaalida ,inkasta oo dadka qaar is weydiin karaan in aanay suuro gal ahayn in magacan soomaalidu isu bixisey, maadaama ay tahay nolol maalmeedkoodii caadiga ahaa.

4.Ereyga carabiga ah ee ذو مال

ereygan‘Duu maalin’ oo isu baddalay mar danbe soomaali,taas oo caddeynaysa hodannimada soomaalida iyo hanti yarida carabta ee barigaas.

5.ereyga **soumahe**

waa erey af-axmaari ah,oo ay u yaqaaneen soomaalida, waxana lagu macneeyaa diin-laawe.

Waxaanay tilmaamaysaa colaadda diimeed ee xabashida iyo soomaalida ka dhaxaysay.

6. Ereyga SO-MAAL oo ah laba erey oo afka ama lahjadda mayga ka soo jeedda oo la micno ah “Hilib-ku-nool”.

7. Sheeko xariireedda soomaalida ee labada nin ee saca heley,

Midi sicii wuu sasabayay,halka midina uu lisayay, kii sasabayay waxa loo bixiyay SAB, kii lisayayna SACMAAL.

magaca ‘soomaali’ iyo qoraalkii ugu horreeyey

- Markii u horreysey ee magaca ‘soomaali’ lagu xuso qoraal waa hees ama hees-libineed ku saabsan guushii boqorkii NEGUS YESHAG(1414-1419) oo itoobiyaan ahaa xilli ay ka guuleysten imaaradii IFAT ,waana xilligii xabashidu gubtey saylac oo ay qudha ka jareen suldaan sacaada diin oo ahaa suldaanka imaaradii IFAT .
- Dhawr meelood oo ku jirta kitaabka futuuxul xabasha ,ee la qorey 1540-1550kii, shihaabaddiin bin axmed.
- Sidoo kale waxa jira buugga **the periplus of the erthyraean sea** oo ah qoraalka ugu da’da weyn ee lagu qorey ereyga ‘berberia’ oo loola jeedo dadka soomaalida ah.

على ملكه واصلح الرعية . وكان سيدنا امام المسلمين احمد بن
ابرهيم الغازى يومئذ فارسا من تحت الجراد ابون وكان ذا
عقل ورأى وشور فى صغره وكبره الهاما من الله تعالى للامر الذى
اراده الله على يده وكان الجراد ابون يحبه حبا شديدا لما
راى من شجاعته وبراعته وبعد ذلک ان الجراد ابون وصل اليه
السلطان ابو بكر بن السلطان محمد بن آزر من ذرية سعد الدين
وجمع عليه الجموع من الصومال من المفسدين وقطاع الطريق
واحربوا الجراد ابون واقتتلوا قتالا شديدا وقتل الجراد ابون بن
آدش فى وطنه على بلاده وعياله قتل شهيدا رحمه الله تعالى .

- Muuqaalkani waa buugga futuuxul xabasha فتوح الحبشة oo lagu sheegey in badan ereyga soomaali, iyo waliba magacyada qabiillo badan oo soomaali ah oo ka qeyb galay dagaalladii axmed gurey ee xabashida.

the Greeks and Romans, as an appellation adopted for every thing that was foreign, or contrary and offenſive to their own ſyſtem of life and manners.

The coaſt of Barbaria is eſtimated at four thouſand ſtadia [m] in the Periplus, and is in reality four hundred and fifty geographical miles, without taking its ſinuoſities into the account. The ſtraits at Bab-el-Mandeb are contracted to three and twenty miles, a ſpace divided into two channels by the intervention of Perim and other iſles, both of which were navigated by the ancients, according to their courſe down the oppoſite ſides of the Red Sea; from the ſtraits, the channel opens in an eaſterly direction to Cana or Cape Fartaque on the Arabian ſide, and to Arômata or Gardefan on the coaſt of Africa. Theſe two promontories form the proper entrance

Muuqaalkani waa buugga “periplus of the erythrean sea” oo aan la aqoon qoraaga magaciisa ,kaas oo ku xusey ereyga barbariya oo uu ula jeedo dadka soomaalida ah, isagoo warbixinno badan ka qorey xeebaha soomaalida (barbaria).

Maxaa magaca soomaali loo maqli waayey ?

1. Sababaha ugu waaweyn ee keentey in aan la qorin ereyga soomaali,waxa ka mid ah in ka hor qarnigii 15-aad Ganacsatada xeebaha soomaalida imanaysay aanay hore ugu sii socon jirin carriga soomaaliyeed (hawd)ka, maadaama ay yihiin dad shisheeyaha nebcaa ,sidaa darteed aanay xogogaal u noqnon dhaqannada afka iyo isirka soomaalida.
2. Iyo qoraal la'aanta soomaalida.

Magacyada kala duwan ee loo yaqaanney soomaalida

1.Dhulkii udugga (terra aromatica)
2. Arladii ama Dhulkii punt "The land of punt".
3.Dhulkii caanaha iyo malabka "The land of milk amd honey"
4. berberkii madoobaa "Berberal al aswad".
5.Gobolkii qorfaha (regio cinammafore).

Xageebey soomaalidu ka soo jeeddaa

- 1.sida uu sheegayo aqoonyahanka soomaaliga ahe ee ibraahim cali ,in soomaalidu yihiin dadka ugu faca weyn ee dadyawga geeska afrika,iyadoo afafka suudaan iyo kiiniya qaarkood laga dhex heli karo ereyo badan oo af-soomaali ah.
- Sida uu sheegayo af-aqoonka **ISIDORE DYEN**

"Haddii afafka lagaga hadlo gobol gaar ahi ay ka tiro bataan afaf la bah ah, afafkaas kale oo lagaga hadlo gobol kale ,waxa gobolkaas hore loo aqoonsan karaa in uu yahay saldhiggii ay ka soo jeedeen bulshooyinka ku hadla afafkaasi"

- mar haddii af-soomaaligu ku jiro afafka kushiitiga ah, afafka itoobiya lagaga hadlaana sidoo kale kushitig yihiin, waxa loo qaadan karaa in soomaalidu ka soo jeeddo **koonfurta itoobiya** .
- Deegaanka soomaalida ee asalka ahi uu yahay saylac ilaa ceelaayo iyagoo si tartiib ah u riixey deegaanada oromada.(aragtida i.m lewis).

Aragtiyaha kala duwan ee laga bixiyay ka soo jeedka soomaalidii hore

1.Aragtida koobaad

in bulshada madaw oo dhammi ay ka soo jeeddo xaam, soomaaliduna ka mid tahay.

- Afafkii la odhan jirey hamito semitic hadda waxa la yidhaa afro-asiatic.

- 10-kun oo sanno ka hor ay dad ka soo jeeda isirka xaamka ahi ay ka soo guureen buuraha qooqaaska,ee waqooyiga dadka iiraan.

2.Aragtida labaad - koonfruta itoobiya .


- Deegaanka soomaalida ee asalka ahi uu yahay saylac ilaa ceelaayo.

iyagoo si tartiib ah u riixey deegaanada oromada sida uu rumeysan yahay i.m lewis oo ay oromdu bilowdey in ay guurto 1530kii.

3.Aragtida saddexaad.


In saldhigga soomaalidii hore ahaa waqooyiga dhulka soomaalida (xeebaha).oo ay oromadu soomaalida ka hor ku dhaqnayd carriga soomaalida ee hadda, balse aqoonyahannda qaar (ibrahim ali) ma qabaan dooddaas.

- 11-kun oo sanno ka hor dadka afro-asiatic ahi ay ku urusanaayeen waqooyiga bari ee qaaradda afrika.




Shaxdani waxay muujinaysaa bahda uu af-soomaaligu ka tirsan yahay:

Waxana xusid mudan in afsoomaaliga iyo afka oromadu ay aad isagu dhawyihiin ,waxana la sheegaa in labada af ay kala dhambalmeen 3500 oo sanno ka hor.
sida uu qabo proff M.NUH, qoraaga buugguna ku taageerey.





AFKA FARAACINADII HORE,



FILIQSANAANTA AFAFKA

Isir wadaaga soomaalida iyo masaaridii hore

- 1.Waxa ay ka soo wada jeedaan bah-afeedka afro-asiatic, inkasta oo afkii masaarida ee hieroglyphy uu dhintey.
- Qaab dhismoodkooda iyo kan soomaalida waa la isku soo sooci karaa marka la is barbar dhigo sawirada lagu arkey dhagxaanta ay ku xardhan yihiin muuqaalladu ee dhulka soomaalida iyo kuwa masaaridii hore (dayral baxri).
- **xidhiidhka ganacsi**.

Fooxa oo ay u adeegsan jireen udugga

Malmalka oo ay u adeegsan jireen jidhmarisyo cibaadeysi ah,iyo qaar loo adeegsado engejinta maydka (mummififcation) si jidhka looga ilaaliyo in uu qudhmo, iyagoo rumaysnaa in ay jirto nolol tan ka danbeysaa.

Waxana ay dhoofsan jireen dahab, xawaash, bahalo(maroodiyaal iyo daanyeero) sida ay lagu xardhey gidaarka deyral baxri, taas oo fircoon suhure(2708-2697 MKH)uu iibsadey 80,000 oo cabbir malmal ah,6000 oo birciideed ah (electrum) iyo ganaciyo kale.

- Waxana caddeynaya xidhiidhkaas Socdaalkii caanka ahaa ee ay boqoradda xatshebsuut ku timid dhulka Bunt iyadoo ku tilmaamtey '*dhulkii barakaysnaa ee carriga eebbe'.*

Xageebey ahayd arladii Bunt

- Sida ku xardhan deyaral baxri in dhulkaas BUNT uu ahaa dhul bari kaga beeggan.
- Arlada BUNT taariikhyahannada qaar waxay sheegeen in ay tahay halka labada niil isaga yimaadaan.
- Qaarkood waxay sheegeen in ay tahay ereteriya.
- Aqoonyahan ruush ah oo yuhuudina ah wuxuu ku tilmamay inay ay tahay israaiil,

Isagoo leh in boqoraddii bilqiis ee SABA iyo xatshabsuut ay isku mid ahaayeen.

- Baadhisaha ugu danbeeyay ay sheegayaan in ay ahayd marriinka baabu mandab.
- Murankan waxa keenaya muhimadda taariikheed ee ay arlada bunt leedahay,
- Iyo baadhisaha archeology ah ooo aan dhulka soomaalida si dhammays ah looga samayn.

Caddaymaha ugu waaweyn

- 1.Dhacdada Bad-mareenkii qarqoomey “the ship wrecked sailor”,oo ku saabsan 150 nin oo bad-mareenno faraacino ahaa oo doon kula qallibantay iyagoo u sii jeeda xeebaha dhulkii BUNT ammin laga joogo 2200 sano MKH.

Dhacdadani waxay si weyn u caddeynaysaa in BUNT yahay waqooyiga dhulka soomaalida.

- 2.Buugga the periplus of erythraean sea uu qoraagaasi ku sheegey in marka la dhaafo malao oo berbera loo yaqaanney ilaa la galayo mundus oo maydh&xiis loo yaqaanney ,waxana laga dhoofin jirey udugga loo yaqaan MOKROTU ,isagoo ganacsatada meeshan ku sheegay duul dagaal badan.
- 3.Dharka ay xidhan jireen faraacinadu iyo dharka soomaalida oo aad isugu eg, oo ay ka samaysnaayeen hargo oo jilbaha u joogey,dharkaas oo soo gaadhey xidhashadiisu soomaalida ilaa qarnigii 19-aad.
- Waxana qoraagu uu ku caddeeyay buuggiisa *‘the mystery of the land of punt unravelled’ in arlada punt yahay dhulka asoomaalida sida ay qirayaan tixraacyada loogu badinayo.*

Maxaa laga ogyahay dhaqashada Geela

Sida uu ku doodayo richard bulliet qoraaga buugga *the camel and the wheel*, wuxuu sheegayaa in geelu uga soo gudbey geeska afrika dhinaca koonfurta carabta ee lama degaanka saxaraha ah iyo waqooyiga afrika, waxaanu ku fidey carriga soomaalida iyo jasiiradda ***Suqadra*** xilli laga joogo 2000 MKH, oo aan ka hor la aqoon.

Arrintan qodabbda ay u cuskadeen:

1. In soomaalida iyo yamantu ay isku si u dheefsadaan geela,tusaale ahaan soomaalidu geela ma koraan dushiisa badanaa, halka deegaanada saxaraha ah loo adeegsado rarasho iyo fuulid.
2. In ay isku mid yihiin hab dhaqista geela ee ay isaga egyihiin dadka ku nool jasiiradda Soqadra.

Waxa se u fiirsasho mudan mar haddii dhulka soomaaldia laga dhoofin jirey malmalka iwm, alaabtaas inta aan xeebta la gaadhsiin wixii lagu sii qaadi jirey ,oo la odhan karo waxa uu ahaa geel .

Hodannimada xoolaha soomaalida

Sida uu ka marakacey mr cruttenden oo 1848kii socdaal ku marey xeebaha u dhaxeysa berbera iyo saylac

“tirada adhiga,riyaha,lo’da iyo geela joogta bannaankaaso aad bay u badan yihiin,qaar badan oo odayaasha reeraha waxa laga dhex heli karayay kuwo hasyta 1500 oo geela, adhigana lama tirokoobi karo,iyo dameero badan oo si fiican ula qabdsadey jawigaas”

- *Waxana dhoofka xoolaha soomaalidu bilowdey xilligii uu qabsadey ingiriisku magaalada Cadan 1839-kii ee yaman, kadib markii uu hilib ugu baahdey ciidankiisii.*

Is-riixriixa soomalida iyo oromada

- Aqoonyahannada qaar ayaa aaminsan in soomaalida dhulkan ay degen yihiin ay uga soo horreeyeen oromadu, tusaale ahaan xabaalaha MAGUURAHA loo yaqaan oo la aaminsanaa in ay oromo “gaalo waranley” ahi ku aasanyiiin buuraha ku waqooyiga dhulka soomaalida ilaa HERER.
- Balse markii uu degel baadhis ku sameeyey I.M lewis xabaahalan waxa uu ogaadey in aanay cimrigoodu ka bdneyn 250 sanno. Isagoo sheegey in ay soomaalina yihiin kadib markii la adeegsadey facdoonka karboonka (carbon dating) ee lafahaas.


Balse aragtidan waa laga noqdey oo aqoonyahanno badanbaa aaminsan in ay soomalidu la xilli tahay oromada.

- Soomaalidu waxay ku negeyd dhulka buuralayda ah waligood,marka laga reebo qarnigii 16-aad oo ay oramadu qabsatey deegaanada waqooyi galbeed ee carriga soomaalida, siiba wixii hargeysa galbeed kaga beegan, waxaanay arrintani ka danbeysey xilligii xabashidu jabiyeen imaaradii cadal ee **Axmed gurey**.

- Waxana la sheegay in oromadu ay gaadhey xeebaha soomaalida qaar sida saylac iyo berbera.

Waxana sababay in soomaalidu ku nagaato dhulkan oomanaha ah(howd) maadaama ay ahaayeen reer guuraa xilliga roobka la socda.

- Balse af-yaqaanka soomaaliyeed ee proff cabdalla cumar mansuur wuxuu rumeysanyahay in ereyga **gaal** ahayn markan *oromo* ee ay tahay **geel** ,sida ay ugu dhawaaqaan soomaalida May-mayga ku hadasha. tusaale kale:
  - haruub-gaal ab-gaal ,baargaal , gaal jecel iyo ereyo kale oo la mid ah.



Filiqsanaanta Oromada & Soomaalida

Ka ganacsiga dadka iyo carriga soomaalida

- Soomaalida aalaaba may dhici in addoonsi loo iib geeyo, maadaama ay muslim ahaayeen iyaguna ay ahaayeen dad isku tiirsan oo dagaal badan.
- Soomaali badan ayaa diinta islaamka u diga rogtey si ay uga nabad galaan addoonsiga (aragtida qoraaga) iyo tolnimada soomaalida.
- Marsooyinka saylac bulluxaar,berbera iyo kuwa koonfurta carriga soomaaliyed isiro kale sida oromo uraag iyo dadyaw kale oo afrikaan ah, arrintanina ay keentey in ay oromadu ka sii durkaan deegaanada xeebaha u dhaw maadaama aanay muslim ahayn.
- Sida uu qorey badhasaabkii ingiriiska ee saylac mr Rayne(1920) buugga *the sun ,sand and somalis, wuxuu* ku xusay :

“addoomaha saylac laga dhoofiyo gu’ kasta waxa ay gaadhayeen 600-1000 qofood oo loo dhoofin jirey mukha, xudayda , iyo jidda. ka ganacsigaas foosha xun waxa uu socdey ilaa qarnigii 19-aad”

- *Waxana uu Burton sheegey in maamulkii saylac ka jirey ee xaaji sharmaarke badhtamihii qarnigii 19-aad uu cashuur hal qirish dahab ah ka qaadan jirey addoon kasta.*

- *Dhinaca koonfurta dhulka soomaalida siiba xeebaha banaadir waxa ay taariikhyannadu sheegaan in ay samaynta dharka ay qaban jireen dad addoomo ah, gaar ahaan deegaanada baraawe iyo marka.*

- *Sida uu qorey dhul mareenkii ibin baduuda in xeebaha koonfureed laga dhoofin jirey dharkaas, sidoo kale dadka xoolo dhaqatada ahi ay xoolaha ku raacan jireen addoomahaas., iyagoo qaarkoodna beeraha fali jirey ,iyadoo soo gaadhey qarniga 19aad . Addoomahaasna waxa laga keeni jirey carriga itoobiya (qoraha).*

- *Waxana sii socdey ka ganacsiga dadka oo xeebaha soomalida laga dhoofin jirey ilaa qarnigii 19-aad intii aanay qabsan maamuladii gumeysigu dhulka soomaalida.*

Badhxanka isirka soomaaliga

- Marka la eego saamaynta is-dhexgalka bulshooyinka waxa soomaalida ku dhex milmey dadyaw kala ah Carab, Iiraaniyiin, Hindi ,Baantuu, iyo qaar kale.
- Baadhisaha ka soo baxey hidde-sidaha DNA , iyadoo ay laga maarmaan tahay in baadhistan laga qayb galiyo soomaalida ku nool deegaanada kala fog.

Waxayna sheegeysaa baadhistani in soomaalidu yihiin:

- 80% ay ka soo jeedaan kushitig
- 15% ay ka soo jeeddo qooqaasiyiin.
- 5% dadka ku nool saxaraha afrika ama Baantuu.

Baadhistan lagu sameeyey 201 soomaali ah 2005tii, waxa ka soo baxay in guud ahaan soomaalida lagu tirin karin isirrada bariga afrika oo ay xoog isugu dhaw yihiin Oromoda waqooyiga kiiniya.

- Sidoo kale hidde sidaha E3B1oo ku darsamey samayska soomaalida 5000sanno kahor.

Isirrada ku soo darsamey soomaalida

Arrimaha ugu waaweyn ee keentey in isirro kale ku soo darsamaan soomaalida ee uu buuggani qorey waxa lagu soo koobi karaa :

- Colaaaddii dhex martey cusmaaniyiinta iyo umawwiyiinta

waxa jiray dad badan umawiyiin ahaa oo u soo qaxey xeebaha soomaalida iyo bariga afrika.

- Sidoo kale Sannadkii 970 MKD waxa jirtey shiico badan oo nafahooda la soo cararey kuwaas oo soo gaadhey xeebaha geeska afrika.
- Tiradii ugu badneyd ee carab soo gaadha dhulka soomaalida waxay ahaayeen gu'gii 980 MKD ,iyagoo ka soo baxsadey xasuuqii ay gaysteen qaraamidiyiintii kuwaas oo degey magaalooyinka Baraawe iyo Warshiikh.
- Waxana arrintan aad uga faallodey qoraa caydaruus bin shariif ,buuggiisa بغية الامال "buqyatul aamaal fii taariikhal soomaal".

Waxana ka mid ah meelaha loo malaynayo in isirro kale soomaalida kaga soo darsameen deegaanka Raas kaardaafuu ama raas casayr, waana deegaanka ugu bariyaysa xeebta soomaalida iyo guud ahaan xeebaha afrika, iyada oo ah goob halis badan oo ay maraakiib iyo doonyo badani ku qarqoomi jireen ,bililiqada xoolahasna ay dadka deegaanku qaybsan jireen.

- Dabeedna dadka ay goobtan doonta ama markabku kula qarqoomo ay meesha dagi jireen oo ay hablahana ay ka guursan jireen, dabeedna ay soomaalida sidaa ugu milmi jireen.
  - Waxana xusid mudan in dadkaasi aanay aanay carab kaliya ahayn ee ay ku jiri karaan isirro kale sida hindi iyo beershiyaan IWM.

Maxaa ka jira carabnimada soomaalida.

- Isku milanka abtirsiiyooyinka wadaadadda suufiyada ah “silsilatu baraka” iyo abtirsiinta dhabta ahayd ee qabaailka ay mararka qaar isku darsameen.
- Waxa uu qoraagu sheegey in ay keentey baahinta isirradaas qaabka ay soomaalidu u kala guursato ee xoolo raacatada iyo heerinka hablaha.
- **Ama buur ahaw ama buur ku tiirsanaw** maahmaahdani waxa loo fasiran karaa in ay wada dhaladka mararka qaarkood ay ka xoog weyntahay danaysiga iyo isbahaysiga dhaqaale.
- Qodobada ugu muhimsan ee ay isugu soo dhawaadeen soomaalida iyo carabtu waa dano dhaqaale ama siyaasadeed oo bilaabantay xilligii guumeystuhu uu dhul soomaaliyeed ku wareejiyay itoobiya, iyo dhinaca Diinta islaamka oo iyadu saamaynta ugu weyn ah.

Awowyaal rumeed mise awoowyaal ruuxi ah

- Arrinta sheegashada aabayaal carbeed ma aha mid ku kooban dadka soomaalida, balse ay jiraan qawmiyado badan oo muslimiin ah oo abtirsiintooda ku xidhiidhiya saadada.
- Tusaale boqorka itoobihyaanka ah ee Lij Iyasu oo awawgii uu boqor minilik uu u dardaarmey boqortooyada itoobiya,kadib markii uu muslimey waxa ay arrintani u cuntami weydey boqortooyadii kiristanka ahayd ee itooobiya,oo dagaallo ka dib xilkii laga warejiyay. Oo la sheego in uu abtirsiintiisii baddalay .

Qodobkani waa midka ugu xasaasiyadda badan ee uu buuggu ka hadlayo,waxana shaki weyn la galiyaa in qabiillada soomaalidu wada yihiin mid u dhalasho ah, balse ay jirto sheegasho iyo hayb badalasho heerar badan soo martey, sida ay rumaysanyihiin aqoonyahan badan oo uu ka mid yahay proff maxamed cabdi gaandi.

Fidista Diinta Islaamka iyo dhulka soomaalida

- Dhaqdhaqaaa fidinta diinta islaamka ee dhulka soomaalidu waxa uu xoogganaa qarnigii 14-aad ,taas oo ay ugu caansanayd sida la sheego koox culimo ah oo ka koobneyd 44 wadaad,culimadaas carbeed oo xadramuut ka soo baqooley, ay soo degeen xeebaha soomaalida.
- Waxana la malayn karaa in ugu yaraan 20 qabiil ay ku abtirsadaan wadaaddadaa kala duwan.
- Balse waxa is weydiin mudan ,sababta keentey in ay jirto uun qayb lagu abtirsado wadaaddadaas oo aan inta kale cidi ku abtirsan .

- Sarkaalka cruttenden waxa uu sheegey in sheekh aw-barkhadle ama sh.yuusufal kawnayn uu sahaa soomaali, taasna lagu caddeeyey warqad laga dhex heley qudbigiisa.
- Sheekada bucur bacayr iyo aw barkhadle ayaa iyaduna danaynteeda leh.

Caqiidooyin iyo dhaqanno hore

Diintii WAAQ

- Diintan waxa lagu sheegaa in ay caabudi jireen dadka isirkoodu yahay kushitig sida soomaalida canfarta ,Beja-da Agaw-ga ,oo uu Waaq aha eebbaha cirka iyo uunkaba.
- Afka soomaalida ereyga Waaq wuu ku sii hadhey,waxana ka mid ah gar-waaq-si, iyo magacyo magaalooyin sida, Ceel waaq ,caabud waaq, iyo goobta Waaq=dhambala oo bulluxaar ku taal iwm.

Iyo dhawr hees-hawleed oo ay ku jirto ereyga Waaq, waxana ka mid ah habaar ay dadku isku habaari jireen tusaale ahaan “dhagax waaq kugu dhac.

- Sidoo kale ereyga Waqooyi ayaa xidhiidh la yeelan kara WAAQ .
- Waxana la sheegey in diintani ay soo dhawaatey, oo ilaa qarnigii 20aad bilowgiisii lagu arkey calaamadaha diintaasi sida deegaannada soomaalida qaar ay jireen dad dhiigga lo’da cabba.

- **Saarka .**

  Oo ay badanaa dumarka soomalidu samayn jireen.iyadoo la odhan jirey saarbaa haya, dabadeedna looga garaaci jirey qaab gaar ah oo soo jireen ah.

- **ROOXAANTA AYAANKA**

  waxay aaminsanaayeen soomaalidaa hore in awoodda ilaaha cirku(Waaq) uu dhulka ku maamulayay waxa loo yaqaan Ayaan.
  Ayaamuhu way kala duwanyihiin ,ayaanbaa wax xumeeya ayaanna wax buu hagaajiyaa.
  mid wax daweeya iyo mid kale. Waxana jirey ayaanka da'da yar iyo midka da'da weyn.

- **Qori wegerka**

Qorigan waxa badanaa adeegsan jirey dumarka umulaha ah oo hoosta gashan jirey anma ilmaha barkintiisa hoos galin jirey, waxana ay rumaysnaayeen in uu balaayo xijaab yahay.

Waxana qorigan loo adeegsan jire qaabab kale, sida dagaalka laba qof dhex marta oo kale.

Diinta cibraaniyada

Waa diin xilli hore ka jirtey gayiga soomaalida oo ay yibruhu awood weyn ku lahaayeen.

- Waxana diintani ku xoogganaan jirtey dadka fallaatada la yidhaa oo yuhuud ah, oo itoobiya deggenaa
- kuwaas oo loo rarey dalka israaiil xilliyo dhaweyd.

Diinta masiixiyada

- Masiixiyada oo la filayo in ay ka jirtay dhanka waqooyi bari ee dhulka soomaalida ,taas oo uga timid Dhanka jasiiradda Soqadra oo ay masiixiyaddu xilliyo hore ka jirtey.
- waxa caddeyn looga dhigey iyadoo la arkey xabaalo loo sameeyey sida saliibkii(isku-tallaab) ee masiixiyiinta oo dhulka soomaalida lagu arkey. ,
- Xabaalahani waxay ku teedsan yihiin meelo u dhaw degmada **dhaymoole** oo berbera Koonfur ka xigta.

Ilbaxnimo soomaaliyeed

- 1.ganacsi dhulal kala durugsan ku fidsanaa.

Bariga fog ee aasiya , bariga afrika ciraaq, beershiya jasiiradda carabta ,masar iyo yurub.

2.Xeeldheeri farsamo sid naakhuudanimada (bad-maax),tumaalidda ,dhagax qorka ,dabiibka oo ay yibruhu yaqaaneen, mid qumman iyo mid khuraafaat ahba.

3.Soomaalida xoolo dhaqatanimada waxa uga soo horreeyay beero falashada.

Iyadoo ay keentey xoolo dhaqashada dadka soomaalida ah nabaad guurka badan ee ku yimid deegaanka oo uu dhulkii noqdey qarfo-u-eke (semi desert).taas oo ay xooluhu adkeysi badan u leeyihiin gaar ahaan geelu.

Goobaha degel baadhiseed ee soomaalida

Waxa ka mid ah goobaha buuggan ku xusan ee raadadka taariikhiga ah le sida .Dhambalin ,jilib rixin ,xaad , god xardhane , dhagax nabi galay ,dhagax kurre dabdheer, karin heegane iyo goobo kale.

- **Laas-geel**
- Waa goob 55km hargeysa waqooyi bari kaga beegan.
- Degelbaadhis ay sameeyeen xeeldheerayaal faransiis ah,ay ku arkeen xaradh-godeed ama dhagax-suntaale aad u fac weyn,laguna hillaadiyay 500-7000 oo sanno.
- Xabaalo ay soomaali muslim ahi ku aasanyihiin haddana geesxawaalladooda lagu asley dibi ama sac.
- Waxa muuqaalladaas laga dheehan karaa in dhaqashada lo'du udub dhexaad u ahayd nolosha dadkaas, oo ay ahaayeen sacmaallo intii aanay noqon geel raacato.
    - Sacmaallo oo noqon karta samaale marka loo eego dadka aan ku dhawaaqin xarafka 'c'. Oo uu rumeysan yahay qoraha buuggani in magacaas uu ka soo jeedo ereyga 'soomaali'.

Naqdinta buuggan

Naqdina ama duridda cilmiyaysan ee buuggan loo soo jeedin karo,waxa ka mid ah:

- In buuggani uu diiradda saarayo ama ay baadhistani ku qotonto goob gaar ah, gaar ahaan deegaannada waqooyi ee dhulka soomaalida ,gaar ahaan xaradhyada Laas-geel oo qoraagu uu ku salaynayo badanka dooddiisa. Iyadoo ay ku yartahay buuggan baadhisaha kale ee laga sameeyay deegaanada kale sida koonfurta dhulka soomaaliyeed,NFD,soomaali galbeed, inkastoo ay yaryihiinba baadhisahaasi .
- Waxa kale oo uu qofka buuggan akhrisanayaa is weydiin karaa dhirta faraha badan ee uu qoraagu mala awaalayo marka uu ka sheekeynayo nabaad guurka ku yimid dhuka soomaalida boqolaalkii sannadood ee u danbeysey, taas oo uu qorayo magacyada dhirtii markaas jirtey, inkasta oo uu ku salaynayo aqoonta dhireed ee uu leeyahay qoraagu.

Gunaanad

"Haddii ardeyda soomaaliyeed ee barata taariikhda,degel baadhista ,suugaanta,sooyaalka diimaha iyo falsafaddu ay heli lahaayeen fakaag(fursad)ay ugu kuur galaan qoraallada masaaridii hore ,sida sheekadii bad-mareenkii qarqoomey,sooyaalkii faraaciinta ,socdaalkii boqorradii xatshebsuut ay ku tagtey arladii bunt,iyo qoraalladii qadiimiga ahaa sida qoraagii strabo,agatharchides ilaa qoraagii lama yaqaanka ahaa ee buugga "the periplus of erythraean sea" Waxay run ahaantii garwaaqsan lahaayeen door-roonaanta dhulka barakaysan ee soomaalida ee magacyada badan lahaan jirey (punt,azania , dhulkii ilaahyada".

Dr.maxamed shamsa diin.

Buugga Dirkii sacmaallada, Axmed ibrahim cawaale,2010.

soo koobiddii :Cabdicasiis idiris aw-cali.

Sawirada qaar waxaan ka soo qaatey buugga "Bahda afafka kushitiga iyo taariikhda af-soomaliga"
,cabdalla c.mansuur, 1983.

Khurtuum,suudaan, 8/2017.

Caska61@gmail.com

Allaa mahad leh.